


Dalka Iswiiska gudniinka Dumarku waa ka mamnuuc. Waxey la barbar dhigantaa Jir dil.

Ilaa iyo 10 sanno oo xabsi ah ayaa laguugu xukumi karaa. Xataa haddii ay gabadhu gudniinka ogoleyd. Qofkastoo ka qeybqaata gudniinka Dumarka, ha ahaato qorsheyntiisa ama fulintiisa wuxuu doona ha ahaade sida Dhaqatar, Dhaqatarad, qofka wax Umulisa; Waalidka, ama qof qaraabada ka mid ah waa dembiile, waxaa ku dhacaaya xukun.

Xataa haddi dibada lagu soo gudo Gabarta Iswiiska waxaad ka tahay dembiile.

SHARCIGA DIIDAYA GUDNIINKA DUMARKA



■ Mamnuuc

Gudniinka Dumarku waa ka mamnuuc wadamada Yurubta galbeed, Masar, Ethiopia, Australia, Benin, Burkina Faso, Côte d'Ivoire, Djibouti, Eritrea, Ghana, Guinea, Yemen, Canada, Kenya, Mauritanie, Niger, Nigeria, New Zealand, Senegal, Sudan, South Africa, Tanzania, Togo, Tchad, Uganda, USA, République centrafricaine. (July 2010)

Wadanno kala duwan ee Afrika ayaa waxaa ka socda wargelin xoogan, sida filimo iyo Riwaayado la daawado taasoo lagu talo galey sida loogu hortegi lahaa Gudniinka Dumarka.

Ururo badan ayaa ku dhawaaqay in ay buraarujinta sii wadi doonaan, si aysan u sii faafin Gudniinka Dumarku.

Haddii ad u bahataan adreesyo kale waxa la xiriireysa Caritas Schweiz ama

TERRE DES FEMMES Schweiz.

Caritas Schweiz – Vermittlungsstelle für die Prävention von Mädchenbeschneidung in der Schweiz, Löwenstrasse 3, 6002 Luzern, 041 419 23 55

TERRE DES FEMMES Schweiz, Standstrasse 32, 3014 Bern, 031 311 38 79

CAWINAADA XAGA CAAFIMAADKA

Frauenklinik Inselspital Bern, Effingerstrasse 102, 3010 Bern, 031 632 16 14

Centre hospitalier universitaire Vaudois, Département de Gynécologie et Obstétrique et de Génétique médicale

Unité psycho-sociale, Av. Pierre Decker, 1011 Lausanne, 021 314 32 45

Gynécologie pour adolescentes, UMSA, Av. Beaumont 48, 1011 Lausanne, 021 314 37 60

Hôpitaux Universitaires de Genève (HUG)

Département de gynécologie et obstétrique, 30, bd de la Cluse, 1205 Genève, 022 382 68 16

Département de médecine communautaire et de premier recours, Planning Familial (CIFERN), 47, bd de la Cluse, 1205 Genève, 022 372 55 00

Klinik für Gynäkologie, Universitätsspital Zürich, Frauenklinikstrasse 10, 8091 Zürich, 044 255 50 36/37

Frauenklinik Universitätsspital Basel, Spitalstrasse 21, 4031 Basel, 061 265 90 43

Clinique Vert-Pré, Centre de Chirurgie Plastique, 15 chemin de la Colombe, 1231 Conches / Genève, 022 704 31 13

Frauenklinik Kantonsspital St. Gallen, Rorschacherstrasse 95, 9007 St. Gallen, 071 494 20 21

Département gynécologie obstétrique CHCVS, Hôpital de Sion, Avenue du Grand-Champsec 80, 1950 Sion, 027 603 42 16/17

Mellaha laga cawiyo Dumarka Urka leh iyo marka ad qorsheyneysid in ad Reer yelatid ee gobalka ad degentahaywaxa ka helee boga internetka ee cinwankiisa yahay www.isis-info.ch

MELAHA AY KU KULMAN DADKA AJNABIGA AH KANA HELAN CAWINAD

Bern: Somalische Frauengruppe, 078 901 50 92

Genève: Camarada (accueil et formation élémentaires pour femmes migrantes), Chemin de Villars 19, 1203 Genève, 022 344 03 39

Lausanne: Appartenances (accueil, orientation, espaces de rencontre, formation, soutien psychothérapeutique), Rue des Terreaux 10, 1000 Lausanne 9, 021 351 28 80

Ostschweiz/Zürich: Ostschweizerische Frauengruppe, 078 895 53 45

Sion: Association KALKAL, 079 613 93 47

Ticino: Antenna MayDay, Via Merlina 3a/b, 6962 Viganello, 091 973 70 67 /

Comunità africana del ticino, Lugano, 076 702 56 23

Waxaa qorey ama soo diyaariyey

© Wasaarada caafimaadka (BAG), BAG-lambarkadaabacaada: GP 07.12 30EXT1205

Waxaa si wadajir ah u soo wade saarey iskuuna soo duubanidey:

Wasaarada caafimaadka, Email: migrationundgesundnet@bag.admin.ch, www.miges.admin.ch

TERRE DES FEMMES Switzerland, E-Mail: info@terre-des-femmes.ch, www.terre-des-femmes.ch

Qoraalka: TERRE DES FEMMES Switzerland, SOMALIDA/Somalisch/Somali, waqtiga la daabacay: July 2012, Qormadii 2 (dib u soo cusbooneysiin). Qoraalkan wuxuu marlabaad ku soo baxayaa luqadaha: Jarmalka, Fransiiska, Ingriiska, Amaariga, Carabiiga iyo Tigriinka.

Dalabaad (suuqeynta): www.migesplus.ch – Waxaad ka dalbankartaa Ogeysiiskan guudahaan ku saabsan Caafimaadka oo luqado kala duwan lagu tarjumey. Laanqeyrta cas ee Switzerland, Wasaarada Caafimaadka qeybta Ajnabiga ama www.terre-des-femmes.ch.

Ogeysiiskan waxaa soo habeyey maalgelinta ku sameeyey qolada la yiraahdo migesplus iyagoo tixraacaya mashruuc qarameedka ku saabsan dadka soogalootiga ah iyo Caafimaadka 2008-2013. Waxaana lagu daabacay waraaqo aan ku jirin maadada (Curiyaha) kalooriinta.



Gudniinka Dumarka Waxaan badbaadineynaa Gabdhaheena

Ogeysiis loo gudbinayo Waalidiinta iyo Dumarka



Schweizerische Eidgenossenschaft
Confédération suisse
Confederazione Svizzera
Confederaziun svizra

Swiss Confederation

Federal Department of Home Affairs FDHA
Federal Office of Public Health FOPH

migesplus



TERRE DES FEMMES
Schweiz


Gudniinka Gabdhaha iyo Dumarka wuxuu keenayaa Caafimaad daro, wadanka Iswiiskana waa ka mamnuuc.

Waa maxay Gudniin?

Gudniinka Dumarka waxaa weeye goosmada qeyb ama gebi ahaan iyo dhaawac loogeysto xubinta taranka Dumarka, tasoo loo suubineeynin sabab caafimaad. Gudniinka waa goosmada maqaarka hore oo keliya ama kintirka oo isna lala gooyo (Inzision/ Sunna). Goynta Kintirka iyo faruuraha yar yar waxaa loo yaqaanaa (Exzision). Goynta Kintirka faruuraha yaryar iyo kan waaweyn oo la iskutolaayo ayadoo dabool yar loo reebayo kaasna waxaa loo yaqaanaa (Infibulation).

Marka laga hadlayo Gudniinka Dumarka waxay isugu jirta wax kastoo dhawac u geysanaya Siilka (wax ku mudis, jeexitaan, gosmada ama gubninka Kintirka).

MAXEY YIHIIN DHIBATOYINKA UU KEENI KARA GUDNIINKA DUMARKU?



OGEYSIIS DUMARKA GUDAN

Gudniinku ma aha mid dib loo soo celin karo. Haddi gudniinku dartiisa kaa haysato dhibaato waa lagaa daaweyn karaa.

Waxaa jira Dhaqaatiir taqasus u leh in ay godka siilka weeneyaan ama Kintirka qeyb ka mid sameynkaraan.

Waxaad xaq u leedahay

Waxaad xaq u leedahay in warbixin iyo fasiraad ay kaa siiyan dadka caafimaadka bartey. Haddi aadan luuqada fahmeynin waxaad weydiisan kartaa qof kuu tarjunta.

Waxaad raadsataa qof wax bartey oo aad aamin ku qabtid

La hadal dadka caafimaadka bartey, wargelin badan ayey ka heystaan gudniinka dumarka. Xaga daawada qibrad ayey u leeyihiin.

Uurka iyo dhalmada

Waxaad raadsataa wada hadal dhaqaatiirta markaad uurka yeelatid si dhaqo ah si ay kuugu micneeyaan dhalmada iyo gudniinka waxa ka dhexeya oo ay kuugu diyariyaan dhalmada.

Caawinaad Maskaxiyay

Waxaad raadsan kartaa in maskaxiyay lagaa cawiyo.

Haddi aad toltolan tahay waa lagaa furi karaa. Nabarka daboolaya siilka. Qalitaankaas wuxuu kaa caawin karaa in xanuunka joogtada ah waqtiga caadada kaa yaraato, kaadida, kaadi haysta jirradada, galmada ugu horeysa xanuunkeeda iyo dhalmada. Marka aad tolan tahay mahan qasab in dhalmada lagu qalo. Haddii nabarka lagaa furo waxaad u dhali kartaa caadi. Furitaankaas lagaa furaayo waxaa la sameyn karaa dhalmada kahor ama waqtiga aad dhaleysid. Markaad dhashid kabacdi markale laguma tolaayo.

MAXAY KA DHAHEEN DADKA KALE ARIMAHA GUDNIINKA DUMARKA?

Qofna kuma dhaheeyso diintaadu wey qaldan tahay, qofna kuma dheheeyso dhaqan kaada waa qaldan yahay. Waxaan ku dhahaynaa oo keliya, in Gudniinka Dumarka uu san ahayn wax sax ah. Waxaan ku jirnaa qarnigii 21 waa in aan joojinaa gudniinka Dumarka.

Mark Emmanuel, African Mirror Foundation

Ilaahay inagoo dhan ayuu na abuurey, kuwa dhahaaya waa in Kintirka la gooyo kuwaas waa kuwo Ilaahay abuurtiisa raba in ay su'aal geliyaan

Sheikh Abdullahii Gudow, Macalin Quran

Waxaan ka hadalnaa in dhaqankeena fican yahay, waxaa jecelnahay ilmaheena, waxaan xishmeynaa dadka waaweyn waana xannaneynaa, markay duqoobaan. Dhaqankaas wanaagsan waxaan rabnaa inaan haysano. Laakiin waxaa Dumarkeena iyo gabdhaheena dhibaaya waa in aan bedelnaa.

Zeinab Ahmed, UNICEF Kenia

Dhaqanka ma aha wax sharciyeysan. Isbedel ayaa ku imaanaaya qawanin cusub iyo wargelin cusub, sidaa darteed ayaa waxaa dhacaaya horumar ku yimaada mushtamaca taasoo keenaysa in gudniinka dumarka su'aalo ku yimaadaan.

Berhane Ras-Work, Madaxweynaha Gudiga Afrikanka

Marba marka ka dambeysa waxaa soo badanaaya nimanka raba in ay guursadaan dumarka aan gudneyn. Ayagoo u diidaya dumarkoda xanuun rabaana in ay dareen yeeshaan. Tan labaadna Ragga madoonayaan in ayaga la eedeeyo

Jamal Mohamed

Gudniinka ma aha mid xaqiijiyaya bikranimada ama ka hortegaya galmada badan Mana ku xirna dhalmada, waxaa dhici karta in gudniinku keeno dharmo la'aan, maadaama uu infekshankaada badan yahay.

Berhane Ras-Work, Madaxweynaha Gudiga Afrikanka